**السنة النبوية المشرفة ، ومكانتها في التشريع**

**Sunada nabawiga sharafta leh, iyo meesha ay ka joogto sharciyaynta**

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

**(وَمَا آتَاكُمُ الرَّسُولُ فَخُذُوهُ وَمَا نَهَاكُمْ عَنْهُ فَانْتَهُوا وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ)**

**(Wuxuu Rasuulka idinla yimaado qaata wuxuu idinka reebana ka hara, kana dhowrsada Alle, maxaa yeelay Alle midka ciqaabtiisu daran tahay)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa oo xadiiskiisa sharafta leh ku yiri:

**(تَرَكْتُ فِيكُمْ مَا إِن اعْتَصَمْتُم بِهِ ، فَلَن تَضِلُّوا أَبَدًا : كِتَابَ اللهِ ، وَسُنَّةَ نَبِيِّه)**

(**Waxaan idingaga tagay wax haddii aad qabsataan aydan waligiina lumaynin: kitaabka Alle iyosunada nabigiisa**)

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Wuxuu usoo diray Alle cazza wajalla rusushiisa iyo anbiyadiisa hanuuninta dadka, iyo in laga saaro mugdiyada oo loo saaro nuurka, iyo jidka halaagga oo loo kaxeeyo jidka badbaadada iyo guusha, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah subxaanahu watacaalaa:

**{لَقَدْ أَرْسَلْنَا رُسُلَنَا بِالْبَيِّنَاتِ وَأَنْزَلْنَا مَعَهُمُ الْكِتَابَ وَالْمِيزَانَ لِيَقُومَ النَّاسُ بِالْقِسْطِ}**

(**Dhab ahaan baan ula dirray Rasuulladannadii xujooyin, waxaana u soo dajinnay Kutub iyo Caddaalad, si dadku ugu tooso Caddaalad**).

Kaddib wuxuu ku khatimay risaalooyinka sayidkeena muxamed - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee, wuxuu la yimid sidii Ilaahay sheegay:

**{شَاهِدًا وَمُبَشِّرًا وَنَذِيرًا * وَدَاعِيًا إِلَى اللَّهِ بِإِذْنِهِ وَسِرَاجًا مُنِيرًا}**

(**Adoo marag ah, oo bishaarayn oo digi * oo Dadka Eebe ugu yeedhi Idankiisa, oo siraad ifi ah**).

Risaalo kama dambays ah oo ku habboon waqti kaste iyo meel kaste, wuxuu kusoo dejiyay quraanka kariimka asoo ah kitaab sugan oo mucjis ah oo aan imaanin hortiisa iyo gadaashiisa baadil, kaddib wuxuu u

waxyooday sunada sharafta leh iyadoo faahfaahinayso kitaabka oona sharxayso, wuxuu leeyahay Alle:

{وما ينطِقُ عَنِ الـهَوَى * إنْ هُوَ إلاّ وَحْيٌ يُوحَى}

(**Kumana hadlo hawadiisa * quraankuna waxaan waxyi Eebe ahayn ma aha**), wuxuu leeyahay Alle:

{وَأَنزَلْنَا إِلَيْكَ الذِّكْرَ لِتُبَيِّنَ لِلنَّاسِ مَا نُزِّلَ إِلَيْهِمْ وَلَعَلَّهُمْ يَتَفَكَّرُونَ}

(**Waxaana kugu soo dejinay Quraanka inaad u caddayso Dadka waxa loo soo dejiyay, inay fikiraan**), wuxuu leeyahay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(أَلَا إِنِّي أُوتِيتُ الْقُرْآنَ ، وَمِثْلَهُ مَعَهُ)

(**Waxaa lay siiyay Quraanka iyo la mid ah oo la socda**).

Qofka kitaabka Alle fiirfiirinaya wuxuu ogaanayaa in Alle subxaanahu wataacaalaa uu ku kulmiyay meelo badan amarkiisa iyo kan rasuulkiisa, wuxuu leeyahay Alle:

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اسْتَجِيبُوا لِلَّهِ وَلِلرَّسُولِ إِذَا دَعَاكُمْ لِمَا يُحْيِيكُمْ}

(**Kuwa Xaqa Rumeeyow Maqla Eebe iyo Rasuulka Markuu idiinku Yeedho wax idin nooleeya (XAQA) Ogaadana in Eebe (Karo) inuu kala Dhexmaro Ruuxa iyo Qalbigiisa, oo Xaggiisa laydin soo Kulmin**).

Wuxuu isugu xiray raalligiisa iyo raalliga rasuulkiisa oraahdiisa:

**{وَاللَّهُ وَرَسُولُهُ أَحَقُّ أَنْ يُرْضُوهُ إِنْ كَانُوا مُؤْمِنِينَ}.**

(**Eebe iyo Rasuulkiisa yaa mudnaan badan inay raalli galiyaan hadday Mu'miniin yihiin**).

Sidoo kale Alle wuxuu ku xiray daacadiisa daacada nabigiisa, wuxuu leeyahay:

**{مَنْ يُطِعِ الرَّسُولَ فَقَدْ أَطَاعَ اللَّهَ}**

(**Ruuxii adeeca Rasuulka wuxuu Dhab u Adeecay Eebe**), wuxuu ka dhigay daacadan sababta naxariista, wuxuu leeyahay Alle:

**{وَأَطِيعُوا اللَّهَ وَالرَّسُولَ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ}**

(**Adeecana Eebe iyo Rasuulka waxaad u dhawdihiin in laydiin Naxariistee**), wuxuu leeyahay Alle:

**{وَأَطِيعُوا الرَّسُولَ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ}**

(**Addeeca Rasuulka waxaad Mudantihiin in laydiin Naxariistee**).

Daacadan waxay ku imaanaysaa raacidda sunnadiisa, wuxuu leeyahay Alle:

**{قُلْ إِنْ كُنْتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللَّهُ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ}**

(**Dheh haddaad tihiin kuwo jecel Eebe i raaca haydin jeclaado Eebee hana idiin dhaafo dambigiinee, Eebana wa dambi dhaafe Naxariista**).

Waxay isku waafaqeen culimada umadda iyo fuqahadeeda inay tahay sunada daliil, sidoo kale inay tahay masdarka labaad ee sharciyaynta kitaabka Alle kaddib Alle - cazza wajalla-, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

**{وَأَنزَلَ اللَّهُ عَلَيْكَ الْكِتَابَ وَالْحِكْمَةَ وَعَلَّمَكَ مَا لَمْ تَكُنْ تَعْلَمُ وَكَانَ فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْكَ عَظِيمًا}**

(**Wuxuuna kugu soo dajiyay Eebe Kitaabka iyo Xigmadda wuxuuna ku baray waxaadan aqoon Fadliga Eebana korkaaga waa ku wayny ahay**), wuxuu leeyahay Alle:

**{وَاذْكُرْنَ مَا يُتْلَى فِي بُيُوتِكُنَّ مِنْ آيَاتِ اللَّهِ وَالْحِكْمَةِ إِنَّ اللَّهَ كَانَ لَطِيفًا خَبِيرًا}**

(**Xusuustana waxa lagu akhrin Guryihiin oo aayaadka Eebe ah iyo Sunada (Nabiga), Eebana waa wax walba oge Xeeldheer**).

Sunada sharafta leh waxaa soo galaya oraahda rasuulka iyo falkiisa iyo sugiddiisa, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah subxaanahu watacaalaa:

**{لَّقَدْ كَانَ لَكُمْ فِي رَسُولِ اللَّهِ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ لِّمَن كَانَ يَرْجُو اللَّهَ وَالْيَوْمَ الْآخِرَ وَذَكَرَ اللَّهَ كَثِيرًا}**

(**Waxaa idinku sugan rasuulka Alle kudayasho wanaagsan, ruuxii rajayn Alle iyo maalinta aakhiro, Allana xusa in dadan**).

Taasna waa dhamaan xaaladihiisa, waxaa laga wariyay Cabdullaahi bin Camr - ilaahay raalli haka noqdee- wuxuu yiri: waxaan qori jiray wax kastoo aan ka maqlo

rasuulka Alle, waxaan doonayay inaan xifdiyo Qureysh ayaa iga reebtay arrinkaas waxay dhaheen: wax kaste miyaad qoreysaa oo aad ka maqlayso rasuulka, rasuulka Allaahan wuxuu hadlaa asoo faraxsan iyo asoo caraysan, waan ka istaagay kaddib arrinkaas nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - ayaan u sheegay gacantiisa ayuu ku tilmaamay afkiisa wuxuu yiri:

**( اكْتُبْ ، فَوَ الَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ مَا يَخْرُجُ مِنْهُ إلاَّ حَقٌّ)**

(**Qor waxaan ku dhaartay midka nafteyda ay gacantiisa ku jirto, kama soo baxo xaq mooyee**).

Quraanka kariimka waa asalka jideynta, sunada daahirka ahna waa asalka labaad waxayna tahay midda caddeynayso oona fasireyso wixii kusoo arooray kitaabka Alle (cazza wajalla), maxaayeelay rasuulka wuxuu ahaa midka dadka ugu ogaal badan ujeedada Alle subxaanahu, garsoorkiisa iyo xukunkiisa waxay ka mid yihiin garsoorka iyo xukunka Alle, wuxuu leeyahay Alle:

**{وَمَا كَانَ لِمُؤْمِنٍ وَلَا مُؤْمِنَةٍ إِذَا قَضَى اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَمْرًا أَن يَكُونَ لَهُمُ الْخِيَرَةُ مِنْ أَمْرِهِمْ}**

(**Kuma haboona (umana banaana) nin Mu'min ah iyo Haweeney Mu'minad ah Marka Eebe iyo Rasuulkiisu wax xukumayaan Inay khiyaar u yeeshaan amarkooda, ruuxiise caasiya Eebe iyo Rasuulkiisa wuxuu dhumay dhumid Cad**), wuxuu leeyahay:

**{فَلَا وَرَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ حَتَّىٰ يُحَكِّمُوكَ فِيمَا شَجَرَ بَيْنَهُمْ ثُمَّ لَا يَجِدُوا فِي أَنفُسِهِمْ حَرَجًا مِّمَّا قَضَيْتَ وَيُسَلِّمُوا تَسْلِيمًا}**

(**Eebahaa baan ku dhaartaye ma rumeeyaan intay kugu Xukuntamaan waxa dhex mara oyna ka helin Naftooda dhib, waxaad Xukuntay ooy hogaansamaan hogaansi**), wuxuu leeyahay:

**{وَإِذَا جَاءَهُمْ أَمْرٌ مِّنَ الْأَمْنِ أَوِ الْخَوْفِ أَذَاعُوا بِهِ وَلَوْ رَدُّوهُ إِلَى الرَّسُولِ وَإِلَىٰ أُولِي الْأَمْرِ مِنْهُمْ لَعَلِمَهُ الَّذِينَ يَسْتَنبِطُونَهُ مِنْهُمْ}**

(**Markuu u yimaaddo amar Nabadgalya ah ama Cabsi way Faafiyaan hadday u Celiyaan Xagga Rasuulka ama kuwa cilmiga Leh oo ka mid ah waxaa ogaan lahaa kuwa la soo baxa (Dhabta) oo ka mid ah**), wuxuu inooga digay khilaafka amarka rasuulka wuxuu yiri:

**{فَلْيَحْذَرِ الَّذِينَ يُخَالِفُونَ عَنْ أَمْرِهِ أَن تُصِيبَهُمْ فِتْنَةٌ أَوْ يُصِيبَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ}**

(**Ha ka Digtoonaadeen kuwa Khilaafi Amarka Nabiga inay ku Dhacdo Fidno (Masiibo) ama ku Dhoco Cadaab Daran**).

Waxay faahfaahisay sunada nabiga sharafta leh wax badan qraanka soo koobay, faridda salaadda iyo sakada quraanka waxay ugusoo arooreen si duuduudan, wuxuu yiri Alle:

**{وَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَآتُوا الزَّكَاةَ}**

(**Salaadda ooga sakada bixiya**).

Sideen u oognaa arkaanta islaamka salaad iyo sako iyo xaj annagoon ka helin caddeyn sunada nabiga sharafta leh?, nabiga ayaa caddeeyay arrinkaas, wuxuu leeyahay:

(صَلُّوا كَمَا رَأَيْتُمُونِي أُصَلِّي)

(**U tukuda sida aad ugu aragtaan aan u tukanayo**), wuxuu caddeeyay qaabka falkiisa, iyo oraahdiisa:

(إِذَا قُمْتَ إِلَى الصَّلاَةِ فَكَبِّرْ ، ثُمَّ اقْرَأْ مَا تَيَسَّرَ مَعَكَ مِنَ الْقُرْآنِ ، ثُمَّ ارْكَعْ حَتَّى تَطْمَئِنَّ رَاكِعًا ، ثُمَّ ارْفَعْ حَتَّى تَعْدِلَ قَائِمًا ، ثُمَّ اسْجُدْ حَتَّى تَطْمَئِنَّ سَاجِدًا ، ثُمَّ ارْفَعْ حَتَّى تَطْمَئِنَّ جَالِسًا ، وَافْعَلْ ذَلِكَ فِي صَلاَتِكَ كُلِّهَا)

(**Markaad salaadda u istaagto takbiirso, kaddib akhri wixii kuu fududaaday oo quraan ka mid ah, kaddib rukuuc ilaa aad xasisho adoo rukuucsan, kaddib kasoo kac ilaa aad toosto adoo taagan, kaddib sujuud ilaa aad xasisho adoo sujuudsan, kaddib, kasoo kac ilaa aad xasisho adoo fadhiya, sidaas ku samee salaaddaada oo dhan**)

Sakadana sunada wax badan ayay ka caddeysay, waxay xadidday nisaabyadeeda, sidoo kale xajka wuxuu leeyahay rasuulka:

(خُذُوا عني مناسِكَكم)

(**Iga qaata manaaiktiina**), markuu u yimid ninka sayidnaa Cimraan bin Xuseen -Ilaahay raalli haka noqdee - oo uu ku yiri: maxay tahay axaadiistan aad sheegaysaan oo aad quraanka kaga tagteen? wuxuu ku yiri: ka warran haddaad u tagtaan adiga iyo asxaabtaada quraanka halkeed ka ogaanaysaa in salaadda Duhur ay tahay tiradeeda sidan salaadda Casir tiradeeda sidan iyo waqtigeeda iyo salaadda maqrib sidan? istaagga Carafa iyo tuurista jamaraadka...

Sidoo kale sunada nabawiga waxay faahfaahisay mujmalka quraanka kariimka, sidoo kale waxay qaydeysaa mudlaqa, waxaa ka mid ah qeydidda dardaaranka seddex meelood meel lagu qeyday iyo qofka dhaxlaya inuusan dardaar u baahnayn, waxaa laga wariyay Sacad bin Abii waqaas -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri: wuxuu isoo booqanayay rasuulka Alle anoo Makka ku jirran waxaan iri: hanti ayaan leeyahay hantideyda dhammaanteeda maku dardaarmaa? wuxuu yiri: maya, waxaan iri: barna? wuxuu yiri (maya) waxaa iri: sedex meelood meelna? wuxuu yiri: (**sedex meelood meel way badan tahay, inaad ka tagto kuwa ku dhaxlaya iyagoo hanti leh ayaa ka khayr badan iyagoo sabool ah oo dadka gacan hoorsanaya...**), sidoo kale waxay caddeysay sunada

nabiga in dardaaranka uusan u sugnaanaynin qofka wax dhaxla, wuxuu leeyahay rasuulka:

**(لاَ وَصِيَّةَ لِوَارِثٍ)**

(**Dardaaran uma sugna kan wax dhaxlaya**), waxay sheegtay sunada daahirka ah xaraan inay tahay in la jamciyo haweeney iyo eeddadeeda iyo haweeney iyo habaryarteeda, wuxuu leeyahay rasuulka"

**(لَا تُنْكَحُ الْمَرْأَةُ عَلَى عَمَّتِهَا ، وَلا عَلَى خَالَتِهَا)**

(**Haweeney eedadeeda lalama guursado, iyo habaryarteeda**)

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxamed uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Annaga waxaan sugaynaa meesha ay taagan tahay sunada iyo xujiyadeeda iyo darajada ay ka joogto jideynta, annaga - isla waqtiga naftiisa - waxaan si cad u kala saareynaa waxa ka mid ah sunada cibaadaadka iyo wixii soo galay caadaadka isku baddali karto isbaddalka waqtiga iyo makaanka iyo caadooyinka dadka, sida waxa ku saabsan labiska oo kale iyo waxyaalaha lagu safaro iyo waxyaalaha kale u noqonaya dadka dhaqankooda, casri kaste wuxuu leeyahay caadooyinka u gaar ah oo ka duwan casriga ka horreeyay, waxaan macquul ahayn ina dadka aan ku xambaarno caado gaar ah xagga safarka ama labiska ama cuntada iyagoo lagu marmarsiyoonayo ku dayashada nabiga, caadooyinka waxay u noqonayaan dhaqanka iyo wuxuu ku habboon casriga iyo bay'ada hadduuna khilaafin sharciga sharafta leh, marka uu ku tiriyay shaafici daboolidda madaxa inay ka mid tahay raganimada, taas wuxuu ka eegay duruufta casrigiisa iyo bay'adiisa, maanta arrintaas wax dhib ma laha,

maxaayeelay dhaqanka iyo dooqa arrinkaas ma diidayaan.
Waxaan adkaynaynaa inay yihiin kuwa ugu cadownimada badan sunada labo nooc: nooca koowaad waa kuwa diinta ka ganacsada oo baddala oo nusuusta u leexiya dano gaar ah dhiigana daadiya, magaca diintana wax ku khariba, waxay u malaynayaan inay wanaag samaynayaan, diintana bari ayay ka tahay, kuwan waa ka badbadiyeyaasha uu rasuulka nagag digay oraahdiisa:

**(هَلَكَ الْمُتَنَطِّعُونَ )**

(**Waxaa halaagsamay ka badbadiyeyaasha**), wuxuu yiri seddex jeer, waxaa laga wariyay Cumar bin Alkhadaab - Ilaahay raalli haka noqdee - inuu rasuulka yiri:

**(إِنَّ أَخْوَفَ مَا أَخَافُ عَلَى أُمَّتِي كُلُّ مُنَافِقٍ عَلِيمِ اللِّسَانِ)**

(**Waxa aan aad umaddayda uga cabsanayo waa munaafuq aqoon leh**)

Nooca labaad: waa kuwa aan qaadanin nuurka aqoonta iyo qalabkeeda, wuxuu caddeeyay rasuulka halistooda, wuxuu yiri:

(إِنَّ اللَّهَ لاَ يَقْبِضُ العِلْمَ انْتِزَاعًا يَنْتَزِعُهُ مِنَ العِبَادِ ، وَلَكِنْ يَقْبِضُ العِلْمَ بِقَبْضِ العُلَمَاءِ ، حَتَّى إِذَا لَمْ يُبْقِ عَالِمًا اتَّخَذَ النَّاسُ رُءُوسًا جُهَّالًا ، فَسُئِلُوا، فَأَفْتَوْا بِغَيْرِ عِلْمٍ ، فَضَلُّوا ، وَأَضَلُّوا)

(**Ilaahay cilmiga addoomaha siibid kagama siibo, laakin wuxuu ku qaadaa oofsashada culimada, marka uusan dhaafin caalim dadka waxay sameysanayaan madax jaahiliin ah, waa la weyddiinayaa waxay fatwoonayaan cilmi la'aan way lumayaan wayna luminayaan**).

Sunada sharafta leh bari ayay ka tahay xagjirnimo kaste lagaga leexanayo sahlanaanteeda iyo dhexdhexaadnimada islaamka iyo manhajkiisa, iyo xagjirnomo kale oo giddideedaba uu diiddan yahay, wuxuu leeyahay rasuulka:

(يُوشِكُ رَجُلٌ مُتَّكِئٌ عَلَى أَرِيكَتِهِ يُحَدَّثُ بِحَدِيثِي ، فَيَقُولُ : بَيْنِي وَبَيْنَكُمْ كِتَابُ اللهِ ، فَمَا وَجَدْنَا فِيهِ حَلاَلاً اسْتَحْلَلْنَاهُ ، وَمَا كَانَ فِيهِ حَرَامًا حَرَّمْنَاهُ ، وَإِنَّ مَا حَرَّمَ رَسُولُ اللهِ (صلى الله عليه وسلم) كَمَا حَرَّمَ اللَّهُ)

(**Waxaa soo dhow nin ku dangiigsan salootadiisa oo loo sheegayo xadiiskayga wuxuu oranayaa: waxaa naga dhexeeya kitaabka Alle, wixii aan ka helno xalaal ah waxaan xalaalaysanaynaa, wixii xaaraan ahna waan**

**xarimaynaa, dhabtii wixii uu xarrimay rasuulka waa sida wax Alle xarrimay**).

Xadgudubka iyo ka gaabinta waa xagjirnimo oo ka fog dhexdhexaadnimada islaamka iyo manhajkiisa, waa dulmi weyn oo sunada nabawiga loo geysanayo, taasoo si buuxda u waafaqsan ujeeddooyinka guud ee quraanka kariimka, fahanka ujeedooyinka sunada ayaan ku ogaan karnaa ujeeddooyinka guud ee diinteena toosan, shaki kuma jiro  diinta oo dhan waa cadaalad iyo naxariis iyo dabacsanaan iyo fudeyd iyo dadnimo, dadka aqoonta leh hadda iyo waa horeba waxay qabaan wixii keenaya ujeedooyinkan waaweyn islaamka inuu ka mid yahay islaamka, wixii ka hor imaanaya ama ku dirsanaya inuu islaamka ka hor imaanayo iyo ujeeddooyinkiisa.

Halkan waxaa imaanaya doorka culimada aqoonta u leh inay toosiyaan qallooca dadka baadida iyo qallooca ku sugan, wuxuu leeyahay nabigeena :

**( يَحْمِلُ هَذَا الْعِلْمَ مِنْ كُلِّ خَلَفٍ عُدُولُهُ ، يَنْفُونَ عَنْهُ انْتِحَالَ الْمُبْطِلِينَ ، وَتَأْوِيلَ الْجَاهِلِينَ ، وَتَحْرِيفَ الْغَالِينَ ) .**

(**Cilmigan waxaa ka xambaaraya dad kaste kuwa lagu kalsoon yahay, waxay ka hufaan beenta kuwa baadilka wata, iyo fasirka jaahiliinta iyo taxriifka kuwa xadgudba**).

Waxaan u baahan nahay inaan fahanno sunada annagoo usoo marayno ujeedooyinkeeda iyo ahdaafteeda iyo inaan ad'adkaanin ama aanan ku dhegin muuqaalka nusuusta annagoo aan fahmin ujeeddooyinkooda, taasna waxay ku imaan kartaa akhris maqaasidi ah oo casri ah lagu akhrinayo sunada sharafta leh, oo casriga la socon kara iyo waxyaalaha soo cusboonaado, oona sunada nabiga weyn dadka u dhoweynaysa, kaas ayaa ah cusbooneysiinta oo ay sunada dahiran ugu yeerayso, wuxuu leeyahay rasuulka:

**(إِنَّ اللَّهَ يَبْعَثُ لِهَذِهِ الْأُمَّةِ عَلَى رَأْسِ كُلِّ مِائَةِ سَنَةٍ مَنْ يُجَدِّدُ لَهَا دِينَهَا)**

(**Ilaahay wuxuu usoo saaraa umaddan boqol sano kaste qof diinteeda u cusbooneysiinaya**).

**Allow na waafaji fahanka kitaabkaaga kariimka ah iyo sunada nabigaaga, na bar wixii na anfacaya, naguna anfac wixii aan baranay, dalkeenana noo ilaali iyo dhammaan dalalka muslimiinta.**